Somali
Voksen/
Dad waaweyn

BUP

BARNE-OG UNGDOMSPSYKIATRISK POLIKLINIKK

Isbitaalka xanuunnada maskaxda ee
carruurta iyo dhalinyarada

KU SOCOTA WAALIDIINTA IYO XAFIISYADA NALA SHAQEEYA

Waa muhiim in carruurta iyo dhallinyaradu ay wax yar ka og yihiin BUP inta ayna noo iman ka hor. Buugaagta yar yar ee **"Hva med meg da? "** iyo **"Kan BUP hjelpe meg?"** ayaad ka heli doontaan warbixinno ku saabsan BUP, kuwaas oo loogu tala galay carruurta iyo dhallinyarada.

Haddaba waxaan idinka codsaneynaa inaad akhridaan buugaagtan kuwaas oo asaas u noqon doona inaan wadahadal yeellanno.
War dheeraad ah ka akhriso boggaga netka ee:www.bupbarn.no iyo www.bupungdom.no

WAA MAXAY BUP?

BUP waa kilinig/isbitaal leh takhasus ah dhinaca daryeelka caafimaadka nafsadda ee carruurta iyo dhallinyarada. Waxey caawiyaan carruurta iyo dhallinyarada ay da`doodu ka hooseyso 18 sano iyo waalidkooda.

YAA KA SHAQEEYA BUP?

Halkaan waxaad kula kulmi doontaan Dhaqtarka cilmi nafsiga, dhakhtarka cudurrada maskaxda ee carruurta, qof qoysaska la taliya (familieterapeut).
Qof bartey barbaarinta carruurta (klinisk pedagog) ama qof leh takhasus cilmiga bulshada (klinisk sosionom).
Iyo weliba dad kale oo leh xirfado kala duwan, kuwaas oo mararka qaarkood wada shaqeeya.

Haddaba shaqaalaha xafiiskayaga ayaa idinka caawin doona wixii caawimo ah ee aad u baahan tihiin.

SIDEE AYAAD KULA SOO XIDHIIDHI KARTAA BUP?

Badanaa dhibaatooyinka heysta carruurta iyo dhallinyarada, waxey reerku si ey u xallilaan dhibaatada caawimo ka heli karaan adeegyada degmooyinka; dhaqtarka joogtada ah, kalkaalisada caafimaadka (helsesøster), adeega barbaarinta iyo cilmi nafisiga (PPT), xafiiska dadka debedda kula xidhiidha (utekontakten) iyo daryeelka carruurta (barnevernet) Haddii loo baahdo waxay xafiisyadu BUP soo weydiisan karaan talo ama in laga caawiyo sidii carruurta iyo dhallinyarada annaga na loogu soo gudbin lahaa.

Sidoo kale carruurta, dhallinyarada iyo waalidka haddii ay jiraan dhibaatooyin culus, ama ey talo u baahdaan, waxey si toos ah ula soo xidhiidhi karaan xafiiska BUP. Haddii aadan rabin in lagu ogaado, waad is qarin kartaa.

SIDEE CARRUURTA IYO DHALLINYARADA LOOGU SOO GUDBIYAA BUP?

Dadka na loo soo gudbiyo waxay u badan yihiin qaar la kulma dhibaatooyin xagga dareenka ah, kuwaas oo keena in nolol maalmeedku ku adkaado.

Dhibaatooyinkaas waxaa ka mid ah murugo (tristhet), welwel (angst), degenaasho la'aan (uro), feejignaanta oo ka lunta (konsentrasjonsvansker), cadho, fikir badan, raadreeb wax xun oo soo marey, dhib ah dhinaca jidhka iyo raashiinka, khalkhal dhinaca hurdada ama isticmaalid mukhaadaraad.

SIDEE BUP U SHAQEEYAAN?

Ka baaraandegid:
Marka ugu horreysa waxaan ka shaqeyneynaa sidii aan u heli lahayn warbixinta ku saabsan qofka na loo soo gudbiyo si aan u caawino. Warbixintaasi waxaan heleynaa marka ugu horreysa marka aan la hadalno ilmaha/dhallinyarada ama waalidka iyo weliba haddii ay jiraan dad kale oo xaaladda si fiican ula socda. Waxaan kale oo isticmaalnaa foomam su'aalo laysku weydiinayo iyo tijaabooyin. Markaan warbixinnadaas ururinno oo aan helno waxa dhibka ah iyo waxa wanaagsanba, ayaan isku raaci doonnaa dhinaca aan u aragno in carruurta ay u baahan tahay in laga caawiyo, iyo weliba sidii aan u wada shaqeyn laheyn mustaqbalka.

Daaweynta:
Inaan wadahadalno waa sida caadiga ah ee uu BUP u shaqeeyo. Sida caadiga ah waan wadahadli doonaa innaga oo falanqeyn doonna dhibaatooyinka carruurta haysta iyo sidii aan wax uga qaban laheynba, waxaan dejin doonaa qorshe aad ugu wanaagsan horumarka carruurta.

Waxaan wadahadal la yeelan doonnaa waalidka iyo carruurta/dhalinyarada isku mar ama si kala gooni ah iyada oo aan tixgelin doonno sida idinla wanaagsan dhammaantiin. Carruurta yaryar waxaan sida caadiga ah kula sheekeysannaa qol ay yaalliin qalab ay carruurtu ku ciyaaraan. Wadahadalku waxa uu ka koobnaan karaa jilid, ciyaar, wax qoris, wax sawirid ama nashqadeyn. Waxaa dhici kara in lagu biiro kooxo ay ku jiraan dad isku da' ah. Qaar baa laga yaabaa in loo qoro dawooyin.

Waanu wadashaqeyn karnaa, oo siin karnaa talo iyo waxbarasho adeegyada degmooyinka haddii ey macaamiishayadu/isticmaaleyaashayadu sidaa rabaan. Waxaan kale oo u sii diri karaa qeybaha kale ee daryeelka caafimaadka maskaxda ee carruurta iyo dhallinyarada.

Shaqooyin ka hortag ah:
BUP waxay ka qeyb qaadataa waxyaalaha ka hortagga xanuunnada nafsadda, iyaga oo bixiya talooyin, waxbarid iyo hawlo warbixineed.



XUQUUQ SIDEE AH AYAY LEEYIHIIN DADKA YIMAADA BUP?

Qodobbada hoos ku qoran badankooda waxaa laga soo qaatey sharciyada xuquuqda bukaanka ee bogga www.shdir.no/pasientrettigheter

Caawinnada ay ku siinaayaan xafiiska BUP waa **lacag la'aan, mana aha qasab** ee adiga ayaa dooranaya in lagu caawiyo. **Safarka aad BUP ku tagto** waxa kaa bixinaaya xafiiska ceymiska dadweynaha (trygdekontoret) ee degmada aad deggan tahay. Qofka imaanaya waxaa laga qaadayaa lacagta qaybta ku soo aadda (egenandel) oo keliya.

Shaqaalaha ka shaqeeya BUP waxey leeyihiin **sir qarin (taushetsplikt)**. Haddaba waalidka iyo/ama dhallinyaradu waa iney oggolaadaan haddii aan la shaqayneyno xafiisyo kale. Laakiinse haddii ay carruur dhibaato weyn hayso, waxa waajib na saaran ah inaan ogeysiinno xafiiska daryeelaka carruurta (barnevernet).

Dhalliyarada da'doodu tahay 16 sano, waxay leeyihiin xaquuq bukaan oo gooni ah. Lama xidhiidhi karno waalidka haddii ayna dhallinyaradu oggolaan. Laakiinse mararka qaarkood waxaa qasab nagu ah inaan waalidka la xidhiidhno iyada oo aan dhallinyaradu oggolaan, waana marka aannu u aragno in dhallinyarada ay naftoodu halis ku jirto ama ay naftooda dhaawici karaan ama hadii ey warbixinadaasi muhiim tahey sidii waalidku uga soo bixi lahaayeen masuuliyaddii waalidnimo.

Dadka noo yimaado xaq buuxa ayay u leeyihiin inay arkaan waxa laga qoro. Carruurta ay da'doodu ka yar yahay 12 sano waalidka laftigoodu waxay xaq u leeyihiin inay arkaan wixi laga qorey. Dhallinyarada ay da'doodu u dhaxeyso 12 ilaa 16 sano, waxaa go'aan ka gaadhaya BUP iney waalidku arki karaan waxa laga qorey. Qofku wuxuu diiwaanka arkaa markuu weydiisto qofka daaweynaya.

Sidoo kale waxa aad xaq u leedihiin inaad ka **qeybqaadataan** fulinta daaweynta.

Waxa xaq loo leeyahay caawimada lagama maarmaanka ah ee laga helo adeegga takhasuska caafimaad, taas oo la soo qiimeeyey iyada oo la raacayo habab go'an. Waxa lagu soo qiimeyn doonaa muddo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo maalinta ay yimaadaan waraaqaha carruurta lagu soo gudbiyey. Waxaa la bixinayaa warbixin ku saabsan goorta la filayo in daaweyntu billaabato. Haddii caawinta lagu bixin waayo muddadii la qabtay gudaheeda, waxa qofku xaq u leeyahay in uu meel kale caawin ka helo.

Haddii aad ku qanci weydaan caawimada la idin siiyey, waxaad xaq u leedihiin **inaad ka cabataan**. Waxaan idinka codsanaynaa inaad marka hore la soo xidhiidhaan madaxa xafiiska BUP. Hey'adaha sharciga ah ee loo cawdaa waa kormeerka caafimaadka **(Helsetilsynet)** ama ururka u dooda bukaanka **(Pasientombudet)** ee ku yaalla gobolka aad deggan tahay. Ciwaanada xafiisyadaasi waa:www.helsetilsynet.no ama www.helsenett.no/pasientombud

Xuquuqda isbitaalka la rabo lagu dooran karo waxey khuseysaa baadhitaanada ama daweynta horey loo sii qorsheeyay. Ma khuseyso gargaarka degdegga ah. Dhakhtarka joogtada ah ayaa kuu diraaya isbitaalka aad rabto. Qaybta kugu soo aadeysa (egenandel) ee marka socdaalku dheer yahay wey ka badan tahay tan caadiga ah. www.sykehusvalg.no

Bukaanka u baahan adeegyo caafimaad oo isku duwan muddo dheerna soconaya, waxay xaq u leeyihiin in loo sameeyo qorshe iyaga u gaar ah. Qorshahaas wuxuu caddeynayaa wadashaqayn waajib ah oo ka dhexaysa qofka la caawinayo, isuduwaha (koordinator) iyo xafiisyada kale ee uu qofka la caawinayaa ka helo caawimo. www.hpp.no

WARBIXINO WAX KU OOL AH

UTVIKLET AV BUP
NORDLANDSSYKEHUSET
BJØRG EVA SKOGØY
KRISTIN STAVNES

MED STØTTE FRA SOSIAL-
OG HELSEDIREKTORATET

www.bupbarn.no
www.bupungdom.no

DESIGN OG ILLUSTRASJON:
IBEN SANDEMOSE

01/2008 IS - 1303,Somali